
MACLUUMAADKA DHAGAYSIGA DADWEYNHA EE DEGMADA SAN DIEGO

HELITAANKA WARBIKINTA DHAGEYSIGA

1. Warbixinnada Dhageysiga ayaa laga heli karaa xafiisyada PDS waxayna diyaar u ahaan doonaan in baaritaan loogu sameeyo qolalka inta uu socdo dhageysiga. Warbixinnada Dhageysiga ayaa sidoo kale waxaa laga heli karaa websaydhka PDS ee cinwaannada soo socda:

Warbixinta Guddiga Qorshaynta
http://www.sdcounty.ca.gov/pds/PC/sop/PChearing_stream.html

Warbixinta Maamulaha Aagagga:
<http://www.sdcounty.ca.gov/pds/zanext.html>

2. Qollooyinka danaynaya waxay daawan karaan iyo/ama at dhegaysan karaan shirarkii hore iyo kuwa tooska ah ee kulamada guddiga qorshaynta iyagoo booqanaya cinwaanka internetka ee kor ku xusan si loo helo Warbixinnada Guddida Qorshaynta.

TILMAAMAHA LOOGU TALAGALAY QOFKA HADLAYA

1. Haddii aad rabto inaad ka hadasho dhegeysiga, buuxi warqadda hadalka oo ku salaysan mowqifkaaga ku aadan tallada mashruuca. Warqadaha loogu talagalay qofka hadlaya ayaa laga heli karaa qolalka dhageysiga waana in la soo gudbiyaa ugu dambeyn 10 daqiiqo kahor bilowga dhageysiga.

Cagaar – Taageeraya Midabka Guduud Xigeenka - Ka Cadaan - Dhexdhexaad ah
soo horjeeda

2. Markaad la hadlayso guddiga dhageysiga, waxyaabaha soo socda u isticmaal tilmaan ahaan si aad u soo bandhigto bayaankaaga:
 - a. Si cad u sheeg magacaaga iyo cinwaankaaga iyo ururka aad matasho, haddii ay khusayso.
 - b. Sameey bayaanka xaqiiqooyinka khuseeya iyo sababaha aad ku taageerayso mowqifkaaga adigoo ku salaynaya mawduuca laga hadlayo.

Sababo la xiriira ciriiriga wakhtiga ee jira, noqo mid soo kooba wax uu sheegayo. Kaliya ka hadal arrimaha la xiriira dhageysiga dadweynaha oo doodaada xaqiiqooyinka si toos ah ugu xir go'aanka aad rabto in Guddiga ama Maamulaha Aaggaga gaaro.

3. Wakhtiyadan soo socdaa waa in lagu dabaqaa marka lala hadlayo gudiga dhageysiga:
 - a. Marqaati kicida waxa lagu soo koobayaa laba (2) ama saddex (3) daqiiqo hadba sida lagu heshiiyo bilowga dhagaysiga, marka laga reebo haddii ay si cad uga tanaasulaan Guddida Dhagaysiga.
 - b. Haddii dhegeysiga dadweynaha uu yahay mid xiiso weyn u leh bulshada oo dhan, waa in tixgelin la siiyaa magacaabista afhayeen kooxeed si loo sameeyo soo jeedin la isku daray. Codsashada wakhti dheeraad ah waa in lagala xaajoodaa Guddoomiyaha kahor inta aanan la bilaabin markhaatifurka.
 - c. Mar haddii dhageysiga dadweynaha la xiro, ma jiro maragfur kale oo laga qaadayo codsadhaha ama dhageystayaasha marka laga reebo ka jawaabista su'aalaha gaarka ah ee ay soo jeediyaan Guddiga Dhageysiga.

HABRAACYADA GUUD EE DHAGAYSIGA

1. Lambarada qodobada ee lagu daabacay ajandaha guud ahaan, marka laga reebo waxyaabaha qaarkood, waxay muujinayaan siday ay u kala horreeyaan qodobada dhageysiga lagu samayn doono.
2. Marka laga reebo haddii uu si kale u amro Guddoomiyaha Guddiga Qorshaynta ama Maamulaha Aagagga, soo bandhigida mashruuca waxay noqon doontaa sidatan:
 - a. Shaqaalaha waxay soo bandhigayaan mashruuca, goobta mashruuca iyo talooyinka shaqaalaha.
 - b. Codsadhaha ama wakiilka uu soo igmaday ayaa heli doona fursad uu ku marqaati furo mar labaad.
 - c. Kooxda Qorshaynta Bulshada/Kooxda Kafaala-qaadayaasha iyo/ama Guddoomiyaha Guddida Naqshadeynta ama wakiilka uu soo igmaday ayaa heli doona fursad uu ku marqaati furo marka saddexaad.
 - d. Dadka dhageystayaasha ka tirsan ee taageeraya talada shaqaalaha waxay heli doonaan fursad ay ku marag furaan marka afraad.
 - e. Dadka dhageystayaasha ka tirsan ee ka soo horjeeda talada shaqaalaha waxay heli doonaan fursad ay ku marag furaan marka shanaad.
 - f. Codsadhaha ama wakiilka uu soo igmaday ayaa heli doona fursad uu ku bixiyo diidmo kooban.
 - g. Guddiga/maamulaha aagagga ayaa markaas ka wada hadli doona oo go'aan ka gaari doonaan kiiska.

RAFCAANADA

1. Foomamka racfaanka, macluumaadka khidmadda racfaanka iyo shuruudaha gudninta racfaanka ayaa laga heli karaa miiska aaggaga, Adeegyada Hormarinta & Qorshaynta, 5510 Overland Avenue, Suite 110, San Diego, CA 92123. Taleefanka: (858) 565-5981 ama (888) 267-8770 ama websaydhka PDS ee <http://www.sdcounty.ca.gov/pds/zoning/appeals.html>.
2. Habraacyada Racfaanka ee noocyada oggolaanshaha ee kala duwan ayaa laga heli karaa websaydhka PDS ee <http://www.sdcounty.ca.gov/pds/zoning/ZoningNumeric.html.html>. Tixraac ku sameey foomamka PDS 157-163.
3. Dhammaan go'amada ma ahan kuwo rafcaan laga qaadan karo.
4. Talooyinka Guddiga Qorshaynta ee ay go'aamin doonaan Guddida kormeerayaashu maaha kuwo racfaan laga qaadan karo.
5. Rafcaannada waa in lagu soo gudbiyaa **10 (toban) maalmood gudahooda** laga bilaabo taariikhda go'aanka rafcaanka laga qaadanaya la soo saaray. Haddii maalinta tobnaad ay ku beeganto sabtida iyo axada ama maalmaha fasaxa degmada, racfaanka waxaa la gudbin karaa maalinta xigta ee maalin shaqo ah.

